

KU DHAQAN XAFIIS D.



# *Faafin Rasmi ah*

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muqdisho, 31 Jannayo 1974

L. 2 R.1

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sannadii waa Sh 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs, 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOBNIIN

### BOGGA KOWAAD

#### SHARCI

SHARCI L. 6 Jannayo 1974 — *Dhembiyada Maraakibta*

*Shisheeyuhu galaan.*

Bog. 60

### BOGGA LABAAD

#### XEER DOWLADEED

W. M.

### BOGGA SEDDEXAAD

W. M.

## BOGGA KOWAAD S H A R C I

---

SIHARCI L. 6, Tr. 1 Jannayo 1974.

Dhembiyada Maraakiibta Shisheeyuhu galaan.

### GUDDCONSHAHA

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka iyo sharciga 1aad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

#### Qodobka 1aad

Haddii Markab Shisheeye ahi soo galo Dekedaha Soomaaliya iyadoo aanu wadan xaashiyaha sharciga ah ee loo baahan yahay, ama uu si sharci darro ah ugu xad gudbo badda Soomaaliyeed (Somali Territorial Waters) ama uu ku dhaqaaqo waxyaabo dhaawici kara dhaqaalaha Dalka, waxa Markabkaasi galaya dembi (contravvenzione).

#### Qodobka 2aad

Markab kasta oo Shisheeye ah oo ay ku caddaato inuu galay dembiyada ku tilmaaman Qod. 1aad ee sharcigan, wuxuu muteysanayaa ciqaab ganaax ah oo gaadhaysa ilaa 10,000/= (So. Sh.). Bixin la'aanta ganaaxa muddo soddon beri gudaheeda waxay keenaysaa in Markabka lagu hayo dekedda uu joogo ilaa inta lacagtaas la bixinayo.

#### Qodobka 3aad

- 1) Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka ama qofkii kale ee sharci ahaan ku shaqada leh wuxuu awood buuxda u leeyahay inuu bixiyo amar qabasho ama joojin Markab, haddii Markabkaasi ka dib marka uu soo gala Xeebta Soomaaliyeed ay muuqato inuu ka xad gudbay sharcigan.

- 2) Amarka markabka lagu soo saaro waa in si deg deg ah loo fu-liyo lana socodsiiyo inta baadhista dembigu ay ka dhammaaneyso. Amarkaasi wuxuu yahay mid ku meel-gaadh-ah (provisional) ilaa inta lagu hirgelinayo xukun ka soo fula maxkamadda ku shaqada leh oo amarkaas oggolaan karta ama diidi karta.

Qodobka 4aad

Maxkamadda Badbaadada Dalka waxay awood u leedahay dacwadaha hoos yimaadda sharcigan.

Qodobka 5aad

Sharci ama xeer kasta oo aan waafaqsaneyn ama ka soo hor jeeda sharcigan waa la baabiiyey.

Qodobka 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galay 1 Jan. 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1-1-1974.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*